

Maxkamadda Sare ee Koloraado

2 East 14th Avenue
Denver, CO 80203
(720) 626-5460

NATHAN B. COATS
MADAXA CADAALADDA

MAXKAMADDA SARE EE KOLORAADO XAFIISKA MADAXA CADAALADDA

Amar Ku Aaddan COVID-19 iyo Shaqooyinka Maxkamadaha Gobalka Koloraado

Iyadoo uu jiro COVID-19 (Koroona fayras) oo uu fayrasku kusii faafayo bulshooyinka Koloraado, iyo iyadoo aan tixgalinayno waajibka maxkamadaha ka saaran inay ilaaliyaan xuquuqda dastuuriga ah iyo xaqiijinta badqabka muwaadiniinta, maxkamadaha gobalkan uma sii shaqayn karaan sidii caadiga ahayd waxayna sida ugu dhakhsaha badan u bilaabayaan muddo ay ku shaqeeyaan qaab amarjansi ah. Sidaas owgeed, waxaan halka ku amrayaa joojinta qaar ka mid ah shaqooyinkii maxkamadaha iyo sii socoshada bixinta adeegyada muhiimka ah ee maxkamadda guud ahaanba gobalka.

Iyadoo loo hirgalinayo sida ugu dhakhsaha badan, dhamaanba isu imaatinada xeerbeegtida maxkamadaha gobalka, marka laga reebo isku imaatinka xeerbigtada ee dacwadaha leh wakhti kama danbays ah oo dagdag ah oo aan laga fursan karin, ayaa la joojiyay ilaa Abriil 3 2020. Xiligaas, waxaa dib u qiimayn lagu samayn doonaa in loo sii baahanyahay in la sii wado joojinta iyo inkale.

Iyadoo ay taasi jirto, ayaa hadana si kasta ha ahaatee, ay maxkamadaha gobalku u xilsaaranyihiin ilaalinta xuquuqaha dastuuriga ah ee asaasiga ah ee muwaadiniinta gobalka oo waxaana la samaynayaa barkulan looga wada hadlo waxna looga qabto arimaha muhiimka u ah badqabkooda iyo caafimaadkooda, sidoo kale waxaan amrayaa in noocyada soo sacda ee shaqooyinka iyo xaaladaha hoos ku xusan aan la joojin doonin oo ay ka socon doonaan maxkamadaha gobalka inta lagu jiro mudadaas oo dhan:

1. Dacwadaha ku aadan amarada kumeelgarka ah ee ilaalinta dadwaynaha iyo dhagaysiyada dacwadaha amarada daa'iimka ah ee dadka lagu ilaalinayo;
2. Dacwooyinka laga keenayo amarada kumeelgaarka ah ee dadka looga ilaalinayo xaaladaha halista ah ee amarjanisga ah iyo dhagaysiyada dacwadaha

laga keeno amarada kumeelgaarka ah ee xaaladaha dagdagga ah ee halistana ah;

3. Latalinta Crim.P. Rule 5 ee ku aadan dadka la xidho iyo racfaan goynta hore;
4. Dhagaysiga dacwadaha la xirira ka noqoshada heshiis oo uu qayb ka yahay eedaysane xidhan;
5. Tilaabooyin sharciyeedyada muhiimka u ah ilaalinta xuquuqda sharci ee tuhmanayaasha ku eedaysan fal danbiyeedka oo ay ku jiraan kuwa la xirira in lacag lacag lagu sii daayo (boon qaadasho), iyo heshiis wax lagula xaliyo shakhsiyaadka la xirtay;
6. Dhagaysiyada la xiriira kiisaska caruuraha la geeyo meelaha lagu xiro;
7. Dhagaysiyada kiisaska la xiriira guryaha la dago, isku tiirsanaanta iyo dayacaadda iyo tilaabo sharciyeedyada kale ee caruurta la xiriirta;
8. Dacwadaha la xiriira ballan amarjansi ah oo uu dalbado qof cid kale masuul ka ah/ama si gooni ah loogu xilsaaray;
9. Dhagaysiyada dacwadaha lagu xadidayo xiliga ilmo waalid u noqoshada iyo ka hortagga ilmo waalid loogu noqdo korsasho; iyo
10. Tilaabooyinka sharciyeed ee laga qaadanayo xaalad dagdag ah oo qofka uga timaada caafimaadka maskaxda.

Wixii la xiriira shaqooyinka iyo arimaha uusan armarkan muhiim ka dhigin ama uusan mamnuucin, Madaxda Garsoorayaasha dagmooyinka kala duwan ayaa waxay leeyihiin awoodda ay go'aan uga gaaraan in shaqooyinka ama arimuhu ay muhiim u yihiin ka hortagga hilis wayn oo dhibaato dhaqaalo ah oo aan laga fursan karin ama halis caafimaad oo aan laga fursan karin, badqabka ama dheef uu helo shakhsi ama si guud bulshada.

Marka la hirgaliyo amarkan, waxaa la rajaynayaa in Madaxda Garsoorayaasha dagmooyinka kala duwan ay samayn doonaan dadaal kasta oo ay u fududeeyaan shaqooyinka qaab looga qaban karo meel ka baxsan goobta shaqada iyo inay yareeyaan ama ay meesha ka saaraanba dad lala kulmo ama arin sharci oo la isugu yimaado.

Waxaa Lagu Sameeyay Denver, Colorado maanta 16^{ka} 'Maarso, 2020.



Nathan B. Coats

Madaxa Cadaaladda, Maxkamadda Sare ee Koloraado